PORTLAND PUBLIC SCHOOLS
prepared & empowered

Maarso 12, 2020

Qoysaska iyo Bulshada qaaliga ee xubin ka ah Dugsiyada Dadweynaha ee Portland,

Ayadoo aan ka anbaqaadeyno qoraalkan , Maine waxay dhawaan soo saartay hal kiis oo loo maleynayo inuu yahay Coronovirus-19. Keeyskaasi waxaa laga helay Degmada Androscoggin hadaba Xarunta Xakameynta Cudurka ee Maine {Maine CDC] waxay leedahay hada waqtigaan uma aragno inuu ku baahay cudurkaas Bulshada Maine. Si kastaba ha ahaatee Dugsiyada dadweynaha ee Portland waxay si taxadar leh u qaadayaan talaabooyinka ku haboon ee looga hortagi karo inuu ku faafo Bulshadayada cudurkaas Fayraska wata.

Gudoomiyaha Gobolka Maine Gov, Janet Mills ma aysan ku talin in iskuulada la xiro. Hadaba waxaan hada diirada saareynaa inaan iskuuladeena sidii hore u furnaadaan isla markaasna aan si taxadar leh uga war hayno badqabka iyo caafimaadka shaqaalaheena iyo ardaydeena.. Fayraskaan oo lagu magacaabo COVID-19 waxaad kuu soo mari karaa adoo xariir la sameeya ama shaqsi ka shaqsi ula kulma qof qaba cudurkaan fayraska sidaa daraaded waxaan qaadi doonaa talaabooyinka soo socda si taxadar leh.
In la nadiifiyo meelaha badiyaa la tab taabto ee dusha saree e iskuuladayada. In sharci loo dajiyo arday kasta ama Shaqaale kasta oo xanuunsan. In la xadido kulamada dadweynaha iyo Ardayda meelaha laysugu yimaado isla markaasna safarada garoomada. Si kastaba ha ahaatee xaaladu si dhaqso ah bay isku badali doontaa, markaa fadlan ogsoonoow inaan ku dari doono waxii soo cusboonaada ee taxadar dheeri ah ee loo baahanyahay oo ay soo gudbiso Waaxda caafimaadka dadweynaha.

Xadidida Meelaha Dadweynaha ku kulmaan iyo Xirfadaha

SI aan u yareyno ama u xadidno inuu fayraskaas u soo gaadhin waa inaynu badalnaa qaabkeena kulmada iyo waqtiyada xirfadaha.. Waxaanu kansalgareeyn doonaa dhamaan kulamada ay dadku ku kulmayaan kuna lug leh Iskuulada{ tusaale ahaan munaasabadaha waalidiinta kulamada PTO-GA munaasabadaha ardayda oo ay ku jiraan waalidiinta iwm}. Dhamaan musaabadaha degmada , oo ay ku jiraan xirfadaha iyo Manhajka iyo dhacdooyinka manhajka dib ayaa loo dhigayaa ama waa la baajinayaa oo maba jiri doonaan. Intaa waxaa u dheer waan joojin doonaa Safarada dibada ee dhamaan xiligaan la joogo. Si aan digtooni aad u xoog leh u qaadno waxaan iyadana la joojin doonaa inay dadka ku shaqeeya iskaa wax u qabso aysan imaanin Dhismayaasheena. Hadaba ,qadada iskuulada, kulamada Jimicsiga ama jiimka iyo munaasabadaha kale ee ardaydu iskugu imaanayaan way jiri doonaan laakiin qoysaska ama dadweynaha ma imaan karaan. Midani waxay isbadali kartaa mustaqbalka.

Kulamada Macaliminta –iyo Walidka

Waxaan sii wadaynaa kulamada waalidka iyo macalimiinta waqtigaan. Waxaan wu sheegaynaa in waalidiinta ama masuuliyiinta ilmaha hadey jiranyahiin shirkooda loogu qaban karo taleefoon.

Waa inaad nala socodsiisaa hadaad rabto inaad safarto

Qoysaska iyo Shaqaalaha iskuulada PPS waa inay la socodsiiyaan Kalkaalisada caafimaadka ee iskuulada hadii ay u safreen wadama leh Xarumaha Xakameynta Cudurada CDC , ama aad xariir dhaw la lahayd qof qaba, ama aad qorsheyneyso inaad safar ugu baxi doonto wadanka dibadiisa xiliga kulaylaha ama dhamaadka sanad dugsiyeedka waxaa ka heli kartaa CDC macluumaad ku saabsan Safartaas .
https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/travelers/index.html

Ardayda jiran ama La talaalo

Ardaygii lagu arko astaamaha COVID -19 Qufac qalalan, qandho, waxaa lagu hayn doonaa meel gooni ah ilaa uu waalidkiis ka yimaado oo uu wato. Iyo Xasuusin, Arday kasta oo qandhan waa inuu guriga joogaa ilaa qandhadu deyso iyadoon daawo qandho jabiye isticmaalayn , oo ay ka mid yahiin acetaminophen (Tylenol), 24 saac gudahood. Waalidiinta iyo ardayda uu jirkooda leeyahay difaac wanaagsan waxay go'aansan karaan inay ilmahooda u diri karaan iskoolka waana inay war galiyaan Kalkaalisada lana socdsiiyaan si Ardada kale looga daafaco looga warqabo..

Waxaa suurtagal ah in la Xiro iskuulka
Kalkaalisayaasha caafimaadka ee dugsiyada iyo maamulayaasha ayaa sii wadaya inay sii wadi doonaan inay la shaqeynayaan waaxda caafimaadka si ay dadweynaha ula socodosiiyaan xaalada caafimaadka macnuhu waa, waxaa suurtagal ah inay dhaci karto inaan iskuulada xirno si aan u ilaalino ardada iyo shaqaalaha.. hadii midaas dhacdo waxaan qorsheyneynaa inaan ardada siino qalab waxbarasho oo ay ku isticmaalaan guriga. Waxaa qayb ka ah qorshaheena inaanu horumarin ku sameyno tiknoolojiyada ama qalabka awood farsama leh. Waxaan ognahay inaysan dhamaan qoysaskeenu aysan haysan ama awood u lahayn haysashada internetka ama qalabka teknoolajiyada, hadaba waxaan qorsheeyneeynaa inay ardadu heli karaan farsamadii ama teknoolijiyadii ay u baahnaayeen ee ay ku heli karaan ama ku gali karaan si ay waxbarashadooda u sii wataan iyagoo gurigooda ama meelihii loogu tala galay jooga. Fasalada Pre-K ma jiri doonaan inta lagu guda jiro xaaladaan xiritaanka.

Barnaamijka Qadada Iskuulka*d.*
Waxaanu sii wadi doonaa Barnaamijka qadada inta lagu jiro xaaladahaan isku cakiran. Waxaa nalo ogolyahay inaan Barnaamijakayaga cuntada u sii wadi karno sida aan u qaban jirnay waqtiga kulaylaha ama xagaaga aan u sii wadi karno hada. Markay dhacdo in iskuulka la xiro waxaan waydiin doonaa meelaha ama goobaha lagu bixinayo cuntada inta Iskuulka uu xiranyahay.

Ujeedadayada guud ahaaneed waa sidii loo sii wadi lahaa waxbarashada Ardayda ayadoo la hubinayo badbaadada ardayda iyo shaqaalaha! Waxaan sii wadi doonaa inaan idinla socodsiino waxii warbaxin ah ee ku saabsan horumarka ama arimaha fayraska. Waxaan ku dhiiri galineynaa qof walba inuu sii wado taxadarka. Guriga jog hadaad jirantahay, markaad qufaceyso afka daboolo, joogtee inaad gacmaha dhaqato. Kuligeenba aan ka wada shaqeyno sidii uu qof walba u badqabi lahaa.

Waxii warbaxin ah eek u saabsan fayraska waxaad kala socon kartaa[COVID-19 PPS Information Center](#) on our website.

Xavier Botana
Superintendent

P429- SOM Corona Letter 3-12-2020